

Dib ugu laabashada barbaarinta hore iyo waxbarashada hore laga bilaabo 14.5.2020, marka laga eego dhanka kooxda u nugul halista cudurrada

Sid ay sheegtay hay'adda caafimaadka iyo nololwanaagga (THL) waa arrin dhif ah, in xanuunka feyruska korona ee aadka u daran uu ku dhaco carruurta, mana jirto wax khatar ah oo ku soo korortay dhanka carruurta caafimaadka qaba iyo carruurta iyo dhalinyarada ee xaaladaha xanuunnada asaasiga ah daryeelkoodu uu yahay mid isu dheelitiran. Kooxda u nugul halista cudurrada ee xanuunka feyruska korona ee aadka u daran, waxaa ka mid ah carruurta ay xanuunnada asaasiga ah ku keeni karaan in uu ku dhaco khatarta ah caabuqa ama infekshanka aadka u daran.

Barbaarinta hore (Varhaiskasvastus):

Waalidka ayaa go'aan ka gaaraaya ka qaybqaadashada ilmaha ee waxbarashada baraabrinta hore laga bilaabo 14.5.2020.

Haddii ilmaha ama xubnaha qoyskiisu ay ku jiraan kooxda u nugul halista cudurrada, waalidku waxaa haddii uu doono uu arrinka ku saabsan dib ugu laabashada ilmaha ee waxbarashada barbaarinta hore, kala tashan karaa dhakhtarka arrimahooda daryeelka ka mas'uulka ah. Looma baahna in goobta barbaarinta hore loo keeno wax caddeynta ama shahaadada dhakhtarka ah. Kaliya waxaa ku filan in waalidku uu goobta barbaarinta hore ku soo wargeliyo in aan ilmuhu imaaneynin barbaarinta hore.

- Hagista ku saabsan arrimaha khuseeya kooxda u nugul halista cudurrada ee xanuunka feyruska korona (COVID-19) ee ilmaha ku dhaca(HUS):
[https://www.hus.fi/en/patients/Documents/Instructions%20regarding%20children%20at%20Risk%20for%20severe%20coronavirus%20\(COVID-19\)%20infection.pdf](https://www.hus.fi/en/patients/Documents/Instructions%20regarding%20children%20at%20Risk%20for%20severe%20coronavirus%20(COVID-19)%20infection.pdf)

Waxbarashada hore (esiopetus):

Waxbarashada hore waa in laga soo qeybgalaa laga bilaabo 14.5.2020, haddii ilmaha iyo xubnaha qoyskoodu aanay ka mid ahayn kooxda u nugul halista cudurrada.

Isbitaallada jaamacadda iyo hay'adda caafimaadka iyo nololwanaagga ee (THL) ayaa si wadajir ah u diyaariyay liiska cudurrada, kuwaasoo carruurta la xanuunsan loo arko in ay ka mid yihiin kooxda u nugul halista cudurrada, islamarkaana haddii uu ku dhaco feyruska korona uu ku noqon karo qaab xanuun ah oo ad u daran.

- Hagista ku saabsan arrimaha khuseeya kooxda u nugul halista cudurrada ee xanuunka feyruska korona (COVID-19) ee ilmaha ku dhaca(HUS):
[https://www.hus.fi/en/patients/Documents/Instructions%20regarding%20children%20at%20Risk%20for%20severe%20coronavirus%20\(COVID-19\)%20infection.pdf](https://www.hus.fi/en/patients/Documents/Instructions%20regarding%20children%20at%20Risk%20for%20severe%20coronavirus%20(COVID-19)%20infection.pdf)

Haddii qoyska ilmaha uu ka tirsan yahay xubin ka mid ah kooxda u nugul halista cudurrada

Hay'adda caafimaadka iyo nololwanaagga (THL) ayaa diyaarisay liiska xanuunnada, kuwaaasoo ku kordhin kara dadka waaweyn in uu ku dhaco caabuqa daran ee feyruska korona:

<https://thl.fi/en/web/infectious-diseases/what-s-new/coronavirus-covid-19-latest-updates/coronavirus-covid-19/risk-groups-for-coronavirus-disease>

Haddii xubin ka mid ah qoyska ilmaha ku jira waxbarashada hore uu ka tirsan yahay kooxda u nugul halista cudurrada, islamraakana uu waalidku sababtaas awgeed doonaayo in ilmihisu aanay ka qaybgalin waxbarashada hore, waa in waalidku uu codisga ka maqnaanshaha ilmaha ee goobta waxbarashada hore u soo gudbiyaa madaxa xannaanada carruurta. Looma baanha wax shahaado ama caddeyn dhakhtar ah.